





DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA XISAABIYAHAA GUUD

	2020	2021	2022	2023	2024
Tax Revenue	139,529,217	162,766,910	181,691,842	224,631,762	266,763,916
Other Revenue	71,704,628	66,794,410	80,977,903	104,859,950	102,589,875
Total Domestic Revenue	\$ 211,233,845	\$ 229,561,321	\$ 262,669,745	\$ 329,491,711	\$ 369,353,791

WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYAD SANNADDEEDKA - BISHA MAY 2026



Jaantuska 2aad: Dhabta Dakhliga Canshuurta Jan 2025



WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYADDA

Bisha May 2026

WAXAA SOO SAARAY WARBIXINTAAN

XAFIISKA XISAABIIYAHAA GUUD EE DAWLADDA

WAXAAD KA HELI KARTAAN WARBIXINTAAN BOGGA XAFIISKA XISAABIIYAHAA
GUUD

www.oags.gov.so

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda
Degmada Shangani
Mogadishu – Somalia
Email: reporting@oags.gov.so

TUSMADA WARBIXINTA

TUSMADA WARBIXINTA	iii
HORDHAC	1
DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026	2
DAKHLIGA DAWLADDA BISHA MAY 2026 & 2025	3
DAKHLIYADA KALE.....	7
DEEQAHA DIBADDA	7
DHABTA KHARASHAADKA JANAAYO ILAA MAY IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026	9
KHARASHAADKA JOOGTADA AH	14
KHARASHAADKA MASHAARIICDA	14
Lifaaqa 1^{aad}: Faahfaahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah Jan-May 2026	15
Lifaaqa 2^{aad}: Faah-faahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Janaayo-May 2026	42
Lifaaqa 3^{aad}: Soo koobid Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Hay'adaha Jan-May, 2026	58

Liiska Jaantusyada

Jaantuska 1 ^{aad} : Dhabta Dakhliga Dawladda – Bisha May 2026 & 2025	4
Jaantuska 2 ^{aad} : Dakhliga Gudaha – bilaha Jan-May 2026 & 2025	4
Jaantuska 3 ^{aad} : Qaybaha Dakhliga Gudaha May 2026	5
Jaantuska 4 ^{aad} : Dakhliga Canshuuraha Jan-Apr 2026 & 2025.....	6
Jaantuska 5 ^{aad} : Deeqaha Dibadda Jan-May 2026 & 2025	8
Jaantuska 6 ^{aad} : Kharashaadka Joogtada ah Jan-Mayl, 2026-2025.....	10
Jaantuska 7 ^{aad} : Kharashaadka Mashaariicda, Jan-May 2026-2025	11

Liiska Shaxaha

Shaxda 1 ^{aad} : Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Janaayo-May 2026	2
Shaxda 2 ^{aad} : Dhabta Dakhliga May 2026 & 2025.....	3
Shaxda 3 ^{aad} : Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan-May ee sannadaha 2026 & 2025	5
Shaxda 4 ^{aad} : Deeqaha Dibadda Jan-May 2026 iyo 2025.....	7
Shaxda 5 ^{aad} : Dhabta & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda Jan-May 2026,.....	9
Shaxda 6 ^{aad} : Kharashaadka la bixiyey Bisha May 2026 iyo 2025	12
Shaxda 7 ^{aad} : Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Janaayo-May 2026 & 2025	13
Shaxda 8 ^{aad} : Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda	14

HORDHAC

Warbixinta fulinta miisaaniyadda waa warbixin bille ah, waxayna faahfaahinaysaa fulinta ama dhaqangelinta miisaaniyad sannadeedka labada aqal ee barlamaanka ansixiyeen. Waxayna isbarbardhigaysaa dhabta dakhliga ee lasoo uruuriyey iyo kharashaadka Dawladda ee la bixiyey sannadka gudihiisa iyo miisaaniyad sannadeedka dakhliga iyo kharashaadka dawladda. Miisaaniyadu waxay waafaqsan tahay miisaaniyad sannadeedka 2026 oo ay ansixiyeen labada aqal ee baarlamaanka.

Wadarta Dakhliga Gudaha ee miisaaniyad sannadeedka 2026 ayaa ah **\$479Milyan** oo **35%** ka ah wadarta miisaaniyadda dakhliga Dawladda, halka wadarta deeqaha dibadda oo isugu jirta kab miisaaniyaddeed iyo mashaariic ee ku jiray miisaaniyadda ay tahay **\$879Milyan** oo **65%** ka ah wadarta dakhilga miisaaniyad sannadeedka 2026.

Wadarta kutalagalka miisaaniyadda ee Kharashaadka Joogtada ah ayaa ah **\$682Milyan** waxayna ka tahay **49%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud, halka kutalagalka miisaaniyadda kharashaadka mashaariicda ay tahay **\$704Milyan** waxayna ka tahay **51%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2026.

Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2026 ayaa ahayd **\$169Milyan** wuxuuna ka badan yahay **10%** iskudarka dakhliga gudaha ee la helay Bilaha Janaayo ilaa May 2025. Sidoo kale iskubiirinta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2026 ayaa ahayd **\$146Milyan** waxayna ka badan tahay **46%** iskubiirinta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025.

Wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026 ayaa ahayd **\$332Milyan** wuxuuna ka badan yahay **14%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May ee sannad maaliyadeedkii hore ee 2025.

Warbixintaan ayaa ka koobnaan doontaa saddex qaybood. Qaybta koowaad ee warbixinta fulinta miisaaniyadda oo lagu faahfaahin doonaa dhabta dakhliga Dawladda; Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha Dibadda, iyadoo la isbarbardhigi doono dhabta dakhliga iyo miisaaniyad sannadeedka qaybaha dakhliga Dawladda ka kooban tahay.

Qaybta labaad ee warbixinta waxaa lagu faahfaahin doonaa kharashaadka dawladda ee la bixiyey billaha Janaayo ilaa May 2026, Iyadoo loo fiirinaayo waafaqsanaanta sida loogu ansixiyey miisaaniyad sannadeedka 2026. Waxaana loo kala qaadi doonaa kharashaadka dawladda labo qaybood; kharashaadka Joogtada ah iyo kharashaadka mashaariicda.

Warbixinta qaybta saddexaad waxaa ku lifaaqan faahfaahinta isticmaalka miisaaniyadda ee hay'adaha dawladda, loona kala qaaday sida ay hay'adaha u fuliyeen kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Lifaafa koowaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa shax faahfaahsan isticmaalka hay'adaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, lifaafa labaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa shaxda isticmaalka hay'adaha ee kharashaadka miisaaniyadda mashaariicda 2026. Lifaafa 3^{aad} soo koobid fulinta mashaariicda.

DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026

Wadarta dakhliga miisaaniyadda asalka ayaa ah \$ **1,357,811,103** oo la filaayo in ay Dawladda soo uruuriso sannad maaliyadeedka 2026 gudihiisa. Miisaaniyada Dakhliga Gudaha ayaa ahayd \$ **478,974,645** oo **35%** ka ah wadarta miisaaniyad sannadeedka, halka deeqaha dibada la filaayo in la soo xareeyo ay tahay \$ **878,836,458** oo **65%** ka ah wadarta miisaaniyadda dakhliga ee sannadka 2026.

	Faah-Faahin	Dhabta May 2026	Dhabta Jan-May 2026	Kutalagalka Miisaaniyadda	% Fulinta
	Canshuuraha				
111	Canshuurta Dakhliga & Faa'iidoyinka	3,525,014	20,027,417	53,262,627	38%
114	Canshuurta Adeegga & Agabka	10,031,662	29,699,706	77,001,675	39%
115	Canshuurta Ganacsiga Dibadda	10,362,317	63,124,481	182,424,346	35%
116	Canshuuraha Kale	1,004,789	3,958,864	14,412,241	27%
	Wadarta Canshuurta	24,923,782	116,810,468	327,100,889	36%
	Dakhliyada Kale				
141	Dakhliga Hantida	-	-	3,244,397	0%
142	Dakhliga libka Agabka iyo Adeegga	7,786,825	47,434,966	145,284,670	33%
143	Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	123,877	567,963	1,089,067	52%
144	Wareejinta aan meel kale lagu Qeexin	0	800,000	0	0%
145	Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyink	3,439,254	3,439,254	2,255,623	152%
	Wadarta Dakhliyada Kale	11,349,956	52,242,182	151,873,757	34%
	Wadarta Dakhliga Gudaha	36,273,738	169,052,651	478,974,645	35%
	DEEQAHA DIBADDA				
131	Deeqaha laba dhinac	-	-	27,000,000	0%
132	Deeqaha Dhincacyada badan	28,824,939	146,166,183	851,836,458	17%
	Wadarta Deeqaha Dibadda	28,824,939	146,166,183	878,836,458	17%
	Wadarta Dakhliga Dawladda	65,098,677	315,218,834	1,357,811,103	23%
151	Daymaha Gudaha	15,000,000	30,000,000		
152	SDR	5,485,238	5,485,238		
	Wadarta Daymaha Gudaha	20,485,238	35,485,238		
32	Hantida Maaliyadeed				
321	Hantida Maaliyadeed	1,092,926	3,211,926	-	0%
	Wadarta Hantida Maaliyadeed	1,092,926	3,211,926	-	0%
	Wadarta Lacag Qabashada Guud	\$86,676,841	\$ 353,915,998		

Shaxda 1^{aad}: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Janaayo-May 2026

Shaxda 1^{aad} waxay soo bandhigaysaa dhabta dakhliga ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo iyo May ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Wadarta dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa May ayaa ah **\$315Milyan** oo u dhiganta **23%** wadarta dakhliga miisaaniyad sannadeedka 2026. Dakhliga Gudaha waxaa ka soo xarooday **\$169Milyan** una dhiganta **35%** wadarta miisaaniyadda dakhliga gudaha, halka Deeqaha dibadda la helay **\$146Milyan** una dhiganta **17%** wadarta deeqaha dibadda ee miisaaniyad sannadeedka 2026.

Wadarta dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ayaa ahayd **\$169Milyan** oo **54%** ka ah wadarta dakhliga dawladda, halka deeqaha dibadda la helay **\$146Milyan** oo **46%** ka ah wadarta dakhliga dawladda ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2026. Dakhliga Canshuuraha ayaa lasoo uruuriyey **\$117Milyan** oo u dhiganta **69%** wadarta dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2026. Dakhliyada kale ayaa la helay **\$52Milyan** oo **31%** ka ah wadarta dakhliga gudaha ee la helay.

Dayn dhan **\$35.5Milyan** oo horumaris/dayn ayaa Wasaaradda Maaliyadda soo qaadatay si loogu bixiyo kharashaadka hortabinta u leh dawladda, waxaan laga soo kala qaatay Bangiga Dhexe iyo Hay'adda Lacagta Addunka.

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ayaa la helay bilaha Janaayo ilaa May dakhli dhan **\$20Milyan** oo u dhiganta **38%** wadarta miisaaniyad sannadeedka canshuurtaan. Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey **\$30Milyan** oo ah **39%** miisaaniyadda sannadka, Sidoo kale Canshuurta Ganacsiga Dibadda ayaa lasoo uruuriyey **\$63Milyan** oo u dhiganta **35%** wadarta miisaaniyad sanadeedka 2026

ee canshuuraha ganacsiga dibadda. Canshuuraha kale ayaa la helay **\$4Milyan** una dhiganta **27%** wadarta miisaaniyad sannadeedka canshuuraha kale ee sannadka 2026.

Dakhliyada kale waxaa la soo uruuriyey bilaha Jan ilaa May 2026 dakhli dhan **\$ 52Milyan** oo u dhiganta **34%** miisaaniyad sannadeedka 2026 ee dakhliyada kale. Dakhliga ugu muhiimsan dakhliyada kale ayaa ah dakhliga kasoo xarooday Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeega waxaana la helay bilah Janaayo ilaa May dakhli dhan **\$47Milyan** oo **33%** miisaaniyad sannadeedka dakhligaan. Dakhliga ganaaxyada ayaa laga helay **\$568Kun** oo **52%** miisaaniyad sannadeedka ganaaxyada.

Kharashka Kidmadaha iyo sheegashooyinku ayaa la helay \$3M, waxaa la dhaafay saadaalinta miisaaniyad sannadeedka 2026. dakhligaan ayaa ah sheegashooyinka ay dawladda ka heshay caymis ay ku jirta.

Deeqaha dhinacyada badan waxaa la helay bilaha Janaayo ilaa May deeq dhan **\$146Milyan** oo u dhiganta **17%** miisaaniyad sannadeedka 2026 ee deeqaha dhinacyada badan. Deeqaha labo dhinac laha lama helin dhakhli intii lagu guda jiray bilaha Janaayo ilaa May 2026.

Wadarta Deymaha Gudaha iyo dibadda ee la soo qaatay bilaha Janaayo ilaa May 2026 ayaa ahayd **\$35,485,238**. Daymaha Gudaha aya laga soo qaatay Bangiga Dhexe, halka daymaya dibadda laga soo qaatay Hay'adda Lacagta Addunka.

Wadarta dakhliga Hantida Maaliyadeed ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa May ayaa ahayd **\$3,211,926** waana dayn horay loo siiyey bangiyada ganacsiga si ay maalgalin ugu sameeyaan ganacsiyada yaryar ee dalka. Lacagta ka muuqata sare waa lacag celin ay sameeyeen bangiyada gaarka si waafaqsan heshiiska ay la geen hay'adda Gaargaar ee hoostagta Wasaaradda Maaliyadda.

DAKHLIGA DAWLADDA BISHA MAY 2026 & 2025

Dakhliga Dawladda wuxuu ka soo xaroodaa dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda. Dakhliga Gudaha ayaa loo kala qaadaa dakhliga canshuuraha iyo dakhliyada kale. Shaxda 2^{aad} waxay isbarbardhigaysaa dhabta dakhliga Dawladdu heshay bisha May ee sannadaha 2026 iyo 2025.


Faah-Faahin	Dhabta May 2026	Dhabta May 2025	Koror/ Naaqus
Dakhliga Canshuuraha			
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	3,525,014	3,391,570	4%
Canshuurta Adeegga & Agabka	10,031,662	5,886,079	70%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	10,362,317	13,306,736	-22%
Canshuuraha Kale	1,004,789	712,811	41%
Wadarta Dakhliga Canshuuraha	24,923,782	23,297,196	7%
Dakhliyada Kale			
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	7,786,825	8,466,991	-8%
Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	123,877	101,142	22%
Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka	3,439,254	0	0%
Wadarta Dakhliyada Kale	11,349,956	8,568,133	32%
Wadarta Dakhliga Gudaha	36,273,738	31,865,329	14%
Deeqaha Dibadda			
Deeqaha Laba Dhinac laha	-	928,489	-100%
Deeqaha Dhinacyada badan	28,824,939	30,393,240	-5%
Wadarta DEEQAHA DIBADDA	28,824,939	31,321,729	-8%
Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda	\$65,098,677	\$63,187,058	3%

Shaxda 2^{aad}: Dhabta Dakhliga May 2026 & 2025

Sida ka muuqato shaxda 2^{aad} dakhliga Dawladda ee la helay bisha May 2026 ayaa ahaa **\$65 Milyan**, wuxuuna ka badan yahay **3%** wadarta dakhliga Dawladda ee la helay bisha May 2025. Dakhliga gudaha ayaa la helay **\$36 Milyan** oo ka badan **14%** wadarta dakhliga gudaha ee la helay bisha May 2025. Halka deeqaha dibadda la helay bisha May 2026 deeq dhan **\$29 Milyan** oo ay ka yar **8%** wadarta Deeqaha la helay bisha May 2025.

Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka ayaa la soo uruuriyey bisha May 2026 dakhli dhan **\$4Milyan** oo ka badan **4%** Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka ee la helay bisha May 2025. Kororka ugu badan ee canshuurtan waxay ka timid Canshuurta Faaiidada Shirkadaha ah oo dhan **\$684 Kun** ee la helay bisha May 2026.

Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey bisha May 2026 dakhli dhan **\$10 Milyan** oo ka badan **70%** Canshuurta Agabka iyo Adeegga ee la helay bisha May 2025. Canshuurta Ganacsiga dibadda ayaa la soo uruuriyey **\$10 Milyan** bisha May 2026 waxayna ka yar tahay **22%** canshuurta Ganacsiga dibadda ee la helay bisha May 2025.




Jaantuska 1^{aad}: Dhabta Dakhliga Dawladda – Bisha May 2026 & 2025

Sida ka muuqata Jaantuska 1^{aad} Dakhliga Gudaha ee la helay bisha May 2026 ayaa ahaa **\$36 Milyan** wuxuuna ka sareeyaa **\$4 Milyan** dakhliga gudaha ee la helay bisha May 2025. Deeqaha dibadda ee la helay bisha May 2026 ayaa ah **\$29 Milyan** waxayna ka yar tahay **\$2 Milyan** deeqaha dibadda ee la helay bisha May 2025.

Deeqaha dibadda ee la helay bisha May 2026 ayaa laga kala helay: Bangiga Adduunka **\$27 Milyan**, Bangiga Horumarinta Afrika **\$ 2 Milyan** Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada waxaa laga helay **\$161 Kun**.

DAKHLIGA GUDAHA JANAAYO ILAA MAY


Odooroska miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha ayaa ahayd **\$479M**, waxaana la helay bilaha Janaayo iyo May 2026 dakhli dhan **\$169Milyan** oo u dhiganta **35%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha. Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2026 ayaa **10%**



Jaantuska 2^{aad}: Dakhliga Gudaha – bilaha Jan-May 2026 & 2025

ka badan iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2025. Sida ka muuqata jaantuska 2^{aad}, wuxuu muujinayaa isbarbardhiga dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadaha 2026 iyo 2025, Dakhliga gudaha ayaa la helay bisha May 2026 **\$36M** oo **14%** ka badan wadarta dakhliga gudaha ee la helay bisha May 2025. Sida ka muuqata jaantuska 2^{aad}, wuxuu muujinayaa isbarbardhiga dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May sannadaha 2026 iyo 2025.

Bisha Janaayo ee sannadka 2026 ayaa la helay **\$33 Milyan** oo **24%** ka badan dakhliga gudaha ee la helay bisha Janaayo 2025. Sidoo dakhliga gudaha ayaa kordhay bisha Febaraayo ee sannadka 2026, waxaana la helay **\$34 Milyan** oo ka badan **6%** dakhliga gudaha ee la helay bisha Febaraayo 2025.



Jaantuska 3^{aad}: Oavbaha Dakhliga Gudaha Mav 2026

Dakhliga gudaha ayaa hoos u dhacay bisha Maarso ee sannadka 2026, waxaana la helay **\$33 Milyan** oo ka yar **5%** wadarta dakhliga gudaha ee la helay bisha Maarso 2025. Bisha Abriil ee sannadka 2026 ayaa la helay **\$32Milyan** oo **18%** ka badan dakhliga gudaha ee la helay bisha Abriil 2025, Bisha May 2026 waxaa la helay dakhli dhan **\$36Milyan** oo ka badan **14%** dakhliga la helay bisha May 2025.

Sida ka muuqato jaantuska 3^{aad}, iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2026, wuxuu **69%** kasoo xarooday dakhliga canshuuraha, halka **31%** kasoo xarooday dakhliyada kale.

Dakhliga canshuuraha ayaa ka soo xarooday canshuuraha kala duwan oo ay dawladdu qaado, waxaan ugu badan canshuurta kasoo xarooto dekada iyo garoonka diyaaraaha Magaalada Muqdishu.

DAKHLIGA CANSHUURAHA

Dakhliga Canshuuraha ayaa loo kala qaadaa 4 qaybood oo kale ah; Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, Canshuurta Agabka iyo Adeegga, Canshuurta Ganacsiga Dibadda iyo Canshuuraha kale. Canshuurta ugu badan dakhliga gudaha ayaa ah Canshuurta Ganacsiga Dibadda.

CANSHUURTA DAKHLIGA IYO FAA'IIDOOYINKA

Canshuuraha Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, waxay ka tahay **17%** dhabta Dakhliga Canshuuraha ee la helay bilaha Jan-May sannadka 2026. Canshuurtaan ayaa laga qaadaa dakhliga soo gala qofka iyo shirkadaha, waxayna ka kala timaadaa, canshuurta mushaarka shaqaalaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah, canshuurta dakhliga kirooyinka daaraha iyo Canshuurta Faa'iidada shirkadaha.

Iskubiirinta Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ayaa la helay **\$20Milyan** oo ka hooseesaa **11%** dakhligii la helay bilaha Jan-May ee sannadka 2025. Iskubiirinta Canshuurta Faa'iidada Shirkadaha ayaa hoos u dhacay bilaha Janaayo ilaa May ee sannad maaliyadeed 2026, waxayna ka hoosaysaa **37%** wadarta Canshuurta Faa'iidada shirkadaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025. Sidoo kale canshuurta kirada daaraha ayaa la helay koror dhan **\$563Kun** ka saraysa **16%** wadarta Canshuurta kirada daaraha ee la helay bilaha Jan ilaa May 2025. Canshuurta Mushaarka shaqaalaha ayaa laga helay **\$11Milyan** bilah Jan ilaa May ee sannadka 2026, waxayna ka yar tahay **1%** canshuurta mushaarka shaqaalah ee lahay bilaha Jan iyo May 2025.

Faah-Faahin	Dhabta Dakhliga Jan-May 2026	Dhabta Dakhliga Jan-May 2025	Koror/ Naaqus
Dakhliga Gudaha	169,052,651	153,159,825	10%
Canshuuraha	116,810,468	111,956,151	4%
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	20,027,417	22,555,979	-11%
Canshuurta Agabka & Adeegga	29,699,706	23,214,716	28%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	63,124,481	62,914,181	0%
Canshuuraha Kale	3,958,864	3,271,275	21%
Dakhliyada Kale	52,242,183	32,635,541	25%
Dakhliga libka Agabka iyo Adeegga	47,434,966	40,785,435	16%
Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	567,963	418,239	36%
Wareejinta aan meel kale lagu Qeexin	800,000	-	-
Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka hadda jira aynu lee nahay	3,439,254	-	0%

Shaxda 3^{aad}: Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan-May ee sannadaha 2026 & 2025

CANSHUURTA AGABKA IYO ADEEGGA

Waxaa la helay bilaha Jan ilaa May 2026 dakhli dhan **\$30Milyan** oo ka badan **28%** marka la babardhigo iskubiirinta Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025. Waxayna ka tahay **25%** wadarta Dakhliga Canshuuraha. Waxaa laga qaadaa canshuurtaan ganacsiyada dalka waxaana ka mid ah; canshuurta gedista ee suuqyada, canshuurta wadamarista gawaarida iyo canshuurta gedista ee laga qaado shirkadaha bixiya adeegyada ganacsiga.


Canshuurta gadista ee badeecadaha kasoo daga dekadada iyo suuqyada ayaa laga helay bilaha Janaayo ilaa May 2026 canshuur dhan **\$21Milyan** oo u dhiganta **69%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega. Canshuuraha Wado-marist, iyo Nootaayooyinka ayaa laga helay **\$9Milyan** oo u dhiganta **31%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa May 2026.

CANSHUURTA GANACSIGA DIBADDA

Canshuurta Ganacsiga Dibadda waa canshuurta laga qaado badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaraadaha Muqdisho. Waana dakhliga ugu muhiimsan dakhliga Dawladda kasoo xarooda gudaha dalka. Bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2026 waxaa ka soo xarooday canshuur dhan **\$63M** oo u dhiganta **54%** wadarta Dakhliga Canshuurah, wuxuuna ka yahay **37%** wadarta dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May sannadka 2026. iskubiirinta Dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2026 ayaa aad ugu dhaw wadarta Canshuurta Ganacsiga Dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2025.

CANSHUURAH KALE

Miisaaniyad sannadeedka Canshuuraha kale ayaa ah **\$14M**, waxaana ka soo xarooday bilaha Jan ilaa May 2026 dhakhli dhan **\$4Milyan** oo u dhiganta **27%** wadarta Dakhliga Canshuuraha kale ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Dakhliga la helay bilaha Jan ilaa May 2026 ayaa **3%** ka ah wadarta dakhliga canshuuraha. Waxayna ka soo xarootaa canshuuraha laga qaado badqabka gawaarida, farankaboolada qaansheegooyinka ganacsiga ee adeegyada ama badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaarahadaha. Iskudarka Canshuuraha kale ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2026 ayaa **21%** ka sareeyso marka la barbardhigo iskubiirinta canshuuraha kale la helay bilaha Jan ilaa May ee sannadka 2025.



Jaantuska 4^{aad}: Dakhliga Canshuuraha Jan-Apr 2026 & 2025

Sida ka muuqato jaantuska 4^{aad} oo soo bandhigaayo isbarbardhig qaybaha dakhliga canshuuraha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadaha 2026 iyo 2025. Wuxuuna kaloo muujinayaa kororka iyo naaquska qaybaha dakhliga canshuuraha marka la is barbardhigayo dakhliga canshuuraha la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadaha 2026 iyo 2025.

DAKHLIYADA KALE

Dakhliyada kale, waa dakhli ka soo xarooda adeegyada maamul oo ay bixiso Dawladda, sida bixinta shatiyada ganacsiga, adeegyada dekadada iyo garoonka diyaaradaha, bixinta baasaboorada, iyo dalkugalka ajaanibta. Waxaana ka soo xarooday bilaha Janaayo ilaa May 2026 dakhli dhan **\$52Milyan** oo ka badan **27%** dakhliyada kale ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannad maaliyadeedka 2025.

Dakhliyada kale ee lasoo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa May 2026, waxaa ka mid ah **\$23Milyan** oo u dhiganta **44%** wadarta dakhliyada kale oo kasoo xarootay adeegyada maamul ay Dawladdu ka bixiso Dekadada iyo Groonka diyaaradaha magaalada Muqdisho. Bixinta Baasaboorada iyo dalkugalka ajaanibta waxaa ka soo xarooday dakhli dhan **\$7Milyan** oo **13%** ka ah wadarta dakhliyada kale. Diyaaradaha mara hawada Soomaaliya waxaa laga helay **\$8Milyan** oo u dhiganta **17%** wadarta Dakhliyada Kale ee la helay bilaha Jan ilaa May 2026. Khidmaha Isgaarsiinta ayaa laga helay **\$3Milyan** oo u dhiganta **6%** wadarta dakhliyada kale.

Sida ka muuqato shaxda 3^{aad}, iskudarka dakhliga kasoo xarooday Ganaaxyada iyo Ciqaabta ayaa kordhay **36%** bilaha Janaayo ilaa May 2026, waxaana la helay dakhli dhan **\$568Kun**, halka bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2025 la helay dakhli dhan **\$418Kun**.

DEEQAHA DIBADDA

Deeqaha Dibadda oo ka ah **65%** wadarta odoroska dakhliga miisaaniyadda sannadka 2026, waxaa la helay **\$146Milyan** oo u dhiganta **17%** miisaaniyad sannadeedka deeqaha dibadda. Wadarta deeqaaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2026 ayaa kor uga kacay **46%**, marka loo fiiriyo wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025. Deeqaha dhinacyada badan ayaa la helay dakhli dhan **\$146Milyan** kana badan **66%** deeqaha dhinacyada badan ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025.

Faah-Faahin	Dhabta Dakhliga Jan-May 2026	Dhabta Dakhliga Jan-May 2025	Koror/ Naaqus
DEEQAHA DIBADDA	146,166,183	100,325,982	46%
Deeqaha laba dhinacclaha	-	12,140,922	-100%
Turkiga	-	7,500,000	-100%
Imaaraatka Carabta	-	4,640,922	-100%
Deeqaha Dhinacyada badan	146,166,183	88,185,060	66%
Bangiga Adduunka	130,912,052	83,991,186	56%
Bangiga Harumarinta Afrika	3,597,131	2,504,067	44%
Qaramada Midoobay	1292860.88	1,295,658	0%
Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE)	10,339,189.65	394,149.84	2523%
Mashruuca Xoojinta Xogta Cilmi baarista	24,950.00	-	


Shaxda 4^{aad}: Deeqaha Dibadda Jan-May 2026 iyo 2025

Deeqaha dibadda waxay isugu jirtaa deeq kab miisaaniyadeed oo ay Dawladdu ka hesho hay'ado caalami ah iyo Dawladaha kabo miisaaniyadda Dawladda iyo kab mashaariic oo loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariicda laga fuliyo dalka gudahiisa.

Sida ka muuqato shaxda 4^{aad} Deeqaha dhinacyadda badan ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2026 Bangiga Adduunka ayaa Dawladda ugu deeqay **\$131Milyan** oo u dhiganta **89.56%** wadarta deeqda, Bangiga Horumarinta Afrika ayaa Dawladda ugu deeqay **\$4Milyan** una dhiganta **2.46%** wadarta deeqda, Qaramada Midoobay ayaa laga helay deeq dhan **1.3M** una dhiganta **0.88%** wadarta deeqda, Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE) ayaa Dawladda ugu deeqday **10Milyan** una dhiganta **7%** wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2026. Sidoo kale shaxda

4^{aad} ayaa soo bandhigayso in Mashruuca Xoojinta Xogta Cilmi barista ay ka soo xarootay dakhli dhan **25Kun** bilaha Janaayo ilaa May 2026.

Sida ka muuqato jaantuska 5^{aad} oo soo bandhigaayo isbarbardhig deeqaha dibadda ee la helay bilaha



Janaayo ilaa May ee sannadaha 2026 iyo 2025. Bisha Janaayo waxaa la helay deeq dhan **\$10Milyan** oo **92%** ka badan deeqda la helay bisha Janaayo 2025. Balse wuxuu hoos u dhacay deeqda la helay bish Febaraayo 2026, waxaana la helay deeq dhan **\$20Milyan** oo ka hooseeya **22%** deeqda la helay bish Febaraayo 2025. Halka bisha Maarso 2026 la helay deeq dhan **\$23Milyan** kana hooseeyso **33%** deeqdii la helay bishii Maarso 2025. Bisha Abriil 2026 waxaa la helay deeq dhan **\$64Milyan** kana

sareeyso **1554%** deeqdii la helay bishii Abriil 2025, Bisha May waxaa la helay deeq dhan **\$29Milyan** oo ka yar **8%** deeqda la helay bisha May 2025.

DHABTA KHARASHAADKA JANAAYO ILAA MAY IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026

Kharashaadka Dawladda waxaa loo kala qaadaa, kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Kharashaadka joogtada ah waa kharashaadka Dawladda ee laga maalgaliyo dakhliga gudaha iyo kabka miisaaniyadeed oo ay Dawladdu ka hesho deeqaha dibabadda. Waxaa laga bixiyaa kharashaadka socodsiinta hawlaha Dawladda, sida mushaaraadka shaqaalaha, Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee hay'adaha Dawladda. Kharashaadka Mashaariicda waxaa laga maalgaliyaa kabka mashaariicda ee Dawladda ka hesho deeqaha dibadda.

	Faah-Faahin	Dhabta May 2026	Dhabta Jan-May 2026	Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala wareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	% Fulinta
	Kharashaadka Joogtada					
21	Mushaarka Shaqaalaha	33,446,326	151,481,842	379,113,058	375,572,558	40%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	16,966,361	50,991,115	178,868,830	181,534,294	29%
24	Dulsaarka	-	1,087,447	6,715,000	7,000,000	16%
26	Deeqaha	5,736,190	20,209,865	90,141,266	90,141,266	22%
27	Faa'idada Bulshada	1,124,647	1,124,647	9,918,000	10,000,000	11%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	119,595	2,019,532	17,697,256	18,140,666	11%
	Wadarta Kharashaadka Joogtada	57,393,119	226,914,447	682,453,411	682,388,785	33%
	Kharashaadka Mashaariicda					
21	Mushaarka Shaqaalaha	294,470	1,148,740	6,040,400	3,640,400	19%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	9,303,178	41,797,822	289,403,848	289,907,080	14%
25	Kaalmo Dhaqaale	-	-	7,160,000	8,660,000	0%
26	Deeqaha	12,125,084	32,143,604	133,888,765	135,096,273	24%
27	Faa'idada Bulshada	-	670,000	35,000,000	35,000,000	2%
28	Other expenses	93,500	14,300,754	35,107,223	34,105,110	41%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	4,214,106	14,703,597	197,753,595	198,009,595	7%
	Wadarta Kharashaadka Mashaariicda	26,030,337	104,764,517	704,353,832	704,418,458	15%
	Wadarta Kharashaadka Guud	\$83,423,456	\$331,678,964	\$1,386,807,242	\$1,386,807,242	24%
	Lacag Bixinnada Kale					
32	Hantida Maaliyadeed		7,611,023	-	-	0%
	Wadarta Lacag Bixinta Guud	\$83,423,456	\$339,289,987			

Shaxda 5^{aad}: Dhabta & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda Jan-May 2026,

KHARASHKA BISHA MAY 2026

Sida ka muuqato shaxda 5^{aad} waxaa la bixiyey bisha May 2026 kharash dhan **\$83Milyan**, Kharashaadka joogtada ah waxaa laga bixiyey **\$57Milyan** oo u dhiganta **69%** wadarta kharashaadka guud, halka kharashaadka mashaariicdana laga bixiyey **\$26M** oo u dhiganta **31%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha May 2026.

Mushaarka shaqaalaha ayaa ugu badan kharashaadka la bixiyey bisha May 2026 waxaana la bixiyey **\$33Milyan** oo u dhiganta **58%** wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$17Milyan** oo u dhiganta **30%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha May 2026. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa laga bixiyey **\$6Milyan** oo **10%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha May 2026.

Kharashaadka mashaariicda ayaa la bixiyey bisha May 2026 kharash dhan **\$26Milyan** oo u dhiganta **31%** wadarta kharashaadka guud. Mushaarka shaqaalaha, kharashaadka la bixiyey bisha May **\$294Kun** oo u dhiganta **1.13%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa lagu bixiyey **\$9Milyan** oo u dhiganta **36%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha May 2026. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey **\$12Milyan** oo u dhiganta **47%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha May 2026. Kharashaadka kale ayaa la bixiyey **\$94Kun** oo **0.4%** ka ah wadarta kharashaadka mashaariicda, halka Kharashaadka

soo iibshashada hantida aan maaliyadda ahayn la bixiyey **\$4Milyan** oo **16%** ka aha wadarta kharashaadka Mashaariicda ee la bixiyey bisha May 2026.


KHARASHAADKA GUUD JAN ILAA MAY 2026

Iskudarka kharashaadka la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026 ayaa ahayd **\$332Milyan** oo u dhiganta **24%** miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2026. Kharashaadka Joogtada ah ayaa la bixiyey **\$227Milyan** oo u dhiganta **33%** kutalagalka miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah, halka kharashaadka mashaariicda laga bixiyey **\$105Milyan** oo u dhiganta **15%** kutalagalka miisaaniyadda kharashaadka mashaariicda ee sannadka 2026.

KHARASHAADKA JOGTADA AH

Mushaaraadka shaqaalaha Dawladda ayaa lagu bixiyey **\$151Milyan** oo u dhiganta **40%** kutalagalka miisaaniyad sannadeedka Mushaarka shaqaalaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, waxayna ka tahay **67%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$51Milyan** oo u dhiganta **29%** kutalagalka miisaaniyadda Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee kharashaadka joogtada ah, waxayna **22%** ka tahay wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka soo iibsashadda hantida aan maaliyadda ahayn ayaa la bixiyey **\$ 2Milyan** oo u dhiganta **11%** kutalagalka miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah, waxayna ka tahay **1%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026.

Sida ka muuqato jaantuska 6^{aad} oo soo bandhigaya isbarbardhig kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May sannadaha 2026 & 2025. Bisha Janaayo 2026 waxaa la bixiyey kharashaadka joogtada ah **\$26Milyan** oo ka badan **9%** kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Janaayo 2025. Waxaa la bixiyey bisha Febraayo 2026 Kharash dhan **\$45Milyan** oo **17%** ka hooseeyo kharashaadka joogtada ee la bixiyey bisha Febraayo 2025.




Jaantuska 6^{aad}: Kharashaadka Joogtada ah Jan-Mayl, 2026-2025

Kharashadka joogtada ah ee la bixiye bisha Maarso ayaa ahayd **\$51Milyan** oo **12%** ka hooseeyo kharashaadka joogtada ee la bixiyey bisha Maarso 2025, Abriil 2026 waxaa la bixiyay kharash dhan **\$48Milyan** waxayna ka sareysaa **38%** wadarta kharashaadka la bixiyey bisha Abriil 2025. May 2026 waxaa la bixiyay kharash dhan **\$57Milyan** waxayna ka sareysaa **16%** wadarta kharashaadka la bixiyey bisha May 2025.

KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Iskudarka Kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026 ayaa ahayd **\$105Milyan** oo u dhiganta **15%** kutalagalka miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka mashaariicda. Kharashaadka Mushaarka Shaqaalaha ayaa la bixiyey **\$1Milyan** oo u dhiganta **19%** kutalagalka miisaaniyadda sannadka ee mushaaraadka, waxayna ka tahay **1%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026.

Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$42Milyan** oo u dhiganta **14%** miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **40%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026. Kharashaadka Deeqaha ayaa la bixiyey **\$32Milyan** oo u dhiganta **24%** kutalagalka miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **31%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026.



Jaantuska 7aad: Kharashaadka Mashaariicda, Jan-May 2026-2025

Sida ka muuqato jaantuska 7aad oo isbarbardhig ku samaynaya kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May ee sannadaha 2026 & 2025.

Bisha Janaayo ee sannadaha 2026 iyo 2025, mashaariicda lama bixin kharshaad muuqda, waxaana la bixiyey kharash ka yar **\$200Kun**.

Balse bisha Febraayo waxaa la bixiyey kharashaad aad uga badan kharashaadka la bixiyey bisha Janaayo. Bisha Febraayo ee sannadka 2026 waxaa laga bixiyey kharashaadka mashaariicda lacag dhan **\$15Milyan** oo **76%** ka badan wadarta kharashaadka Mashaariicda ee la bixiyey bisha Febraayo sannadka 2025. Sidoo kale waxaa la bixiyey bisha Maarso 2026 Kharash dhan **\$35Milyan** oo **18%** ka hooseeya kharashaadka Mashaariicda ee la bixiyey bisha Maarso 2025, Bisha Abriil 2026 waxaa laga bixiyay Mashaariicdda kharash dhan **\$29Milyan** oo aad uga sareeyso **669%** kharashaadka mashaariicda la bixiyay bisha Abriil ee sanadkii hore 2025. May 2026 kharashaadka mashaariicda la baxshay ayaa ah **\$26Milyan** oo ay ka sareeyso **51%** kharashaadka mashaariicda sanadkii hore May 2025.

ISBARBARDHIGA KHARASH BIXINTA BISHA MAY EE 2026 & 2025

Sida ka muuqato shaxda 6aad oo isbarbardhigaysa kharashaadkii la bixiyey bisha May ee sannadaha 2026 iyo 2025. Wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha May 2026 ayaa ka badan **25%** marka la barbardhigo wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha May ee sannadka 2025.

	Faahfaahin	Dhabta May 2026	Dhabta May 2025	Increase /Decrease
	Kharashaadka Joogtada			
21	Mushaarka Shaqaalaha	33,446,326	33,331,566	0%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	16,966,361	10,016,927	69%
24	Dulsaarka	-	1,754,614	-100%
26	Deeqaha	5,736,190	3,890,889	47%
27	Faa'idada Bulshada	1,124,647	-	0%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	119,595	296,263	-60%
	Wadarta Kharashaadka Joogtada	57,393,119	49,290,259	16%
	Kharashaadka Mashaariicda			
21	Mushaarka Shaqaalaha	294,470	387,724	-24%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	9,303,178	8,060,156	15%
26	Deeqaha	12,125,084	4,267,396	184%
28	Other Expenses	93,500	-	0%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	4,214,106	4,571,506	-8%
	Wadarta Kharashaadka Mashaariicda	26,030,337	17,286,783	51%
	Wadarta Kharashaadka Guud	\$83,423,456	\$66,577,042	25%

Shaxda 6^{aad}: Kharashaadka la bixiyey Bisha May 2026 iyo 2025

Kharashaadka joogtada ah, Mushaaraadka shaqaalaha ayaa la bixiyey **\$33Milyan** bisha May 2026, waxayna ku jaan go'an tahay Mushaaraadka Shaqaalaha ee la bixiyey bisha May 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$17Milyan** oo ay **69%** ka sareeyso kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bisha May 2025. Kharashaadka Khidmadda Maalgashiga ma jirin kharash bixin bisha May 2026. Sidoo kale deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey **\$6Milyan** bisha May oo **47%** ka badan deeqaha la bixiyey bisha May 2025, Faa'iidada Bulshadda waxaa la bixiyey bisha May 2026 kharash dhan **\$1Milyan** halka sanadkii hore bishiisa May 2025 ay san jirin wax kharash baxay, Kharashaadka aan hantida Maaliyadda aheyn waxaa la bixiyey bisha May 2026 **\$120kun** waxayna ka hooseysaa **60%** Kharashaadka aan hantida Maaliyadda aheyn ee la bixiyey bisha May 2025.

Kharashaadka Maashaariicda waxaa la bixiyey **\$26Milyan** bisha May 2026, waxayna ka badan tahay **51%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha May 2025. Soo iibshadaha hantida aan maaliyadda ahayn ayaa lagu bixiyey **\$4Milyan** oo ay ka yar tahay **8%** marka la barbardhigo kharashaadkii soo iibshada Hantida aan Maaliyadda aheyn ee la bixiyey bisha May 2025.

Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa la bixiyey **\$12Milyan** oo **184%** ka sareeyso kharashaadka Deeqaha ee la bixiyey bisha May 2025. Sidoo kale musharka shaqaalaha ayaa la bixiyey kharash dhan **\$294Kun** oo **24%** ka yar marka loo barbardhigo mushaarka shaqaalaha ee la bixiye bisha May 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey bisha May 2026 kharasha dhan **\$9Milyan**, wuxuuna ka sareeyaa **15%** kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey bisha May 2025.

ISBARBARDHIGA KHARASH BIXINTA BILAHA JANAAYO ILAA MAY 2026 & 2025

Iskudarka kharashaadka Guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026 ayaa ahayd **\$332Milyan** ayaa **14%** ka badan wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025. Kharashaadka joogtada ah ee May 2026 ayaa ka sareeyo **3%** kharashaadka la bixiyay bisha May 2025, soidoo kale kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026, wuxuuna sare u kacay **46%** marka la barbardhigo iskudarka kharashaadkii mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025.

	Faahfaahin	Dhabta Jan-May 2026	Dhabta Jan-May 2025	Increase /Decrease
	Kharashaadka Joogtada			
21	Mushaarka Shaqaalaha	151,481,842	147,471,111	3%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	50,991,115	41,949,896	22%
24	Dulsaarka	1,087,447	2,847,741	-62%
26	Deeqaha	20,209,865	17,776,087	14%
27	Faa'idada Bulshada	1,124,647	-	0%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	2,019,532	10,018,224	-80%
	Wadarta Kharashaadka Joogtada	226,914,447	220,063,060	3%
	Kharashaadka Mashaariicda			
21	Mushaarka Shaqaalaha	1,148,740	1,414,369	-19%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	41,797,822	29,333,295	42%
25	Kabka	-	172,511	-100%
26	Deeqaha	32,143,604	18,527,647	73%
27	Faa'idada Bulshada	670,000	-	0%
28	Other expenses	14,300,754	11,728,705	22%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	14,703,597	10,584,904	39%
	Wadarta Kharashaadka Mashaariicda	104,764,517	71,761,432	46%
	Wadarta Kharashaadka Guud	\$ 331,678,964	\$ 291,824,493	14%

Shaxda 7^{aad}: Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Janaayo-May 2026 & 2025

Kharashaadka joogtada ah, Mushaaraadka shaqaalaha ayaa la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026 **\$151Milyan**, waxayna **3%** ka sareysaa Mushaaraadka Shaqaalaha ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$51Milyan** oo **22%** ka badan kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025. Sidoo kale deeqaha la siiyo dawlad gobleedyada dalka ayaa lagu bixiyey **\$20Milyan** bilaha Janaayo ilaa May 2026 oo ka badan **14%** deeqaha la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025, Kharashaadka Khimdamadda maalgashiga ayaa la bixiyay **\$1M** bilaha Janaayo ilaa May 2026 waxayna ka hooseysaa **62%** kharashka Kharashaadka Maalgashiga ee la bixiyey Janaayo ilaa May 2025, sidoo kale kharashka Hantida aan Maaliyadda aheyn ayaa la bixiyay Janaayo ilaa May 2026 lacag dhan **\$2M** waxayna ka hooseysaa **80%** kharashka Hantida aan Maaliyadda aheyn ayaa la bixiyay Janaayo ilaa May 2025, Faa'iida Bulshada ayaa la bixiyay bilaha Janaayo ilaa May 2026 **\$1Milyan** mana jiraan wax kharash bixin ah ee Sanadkii hore ilaa Bisha May 2025.

Kharashaadka Maashaariicda waxaa la bixiyey **\$105Milyan** bilaha Janaayo ilaa May 2026, waxayna ka sareysaa **46%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025. Soo iibshadaha hantida aan maaliyadda ahayn ayaa lagu bixiye **\$15Milyan** oo **39%** ka badan marka la barbardhigo kharashaadkii soo iibshada Hantida aan Maaliyadda aheyn ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa la bixiyey **\$32Milyan** oo **73%** ka badan kharashaadka Deeqaha ee la bixiyey bilaha Janaayo-May 2025. Musharka shaqaalaha ayaa labixiyey kharash dhan **\$1Milyan** oo ka hoosaysa **19%** marka loo barbardhigo mushaarka shaqaalaha ee labixiyey bilaha Janaayo-May 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ayaa la bixiyey **\$42Milyan** waxayna ka sareysaa **42%** kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025. Kharashaadka Faa'iidada bulshada ayaa ku baxday **\$670Kun** bilaha Janaayo ilaa May 2026.

Kharashaadka kale ayaa la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026 lacag dhan **\$14Milyan** waxayna **22%** oo ka badan tahay marka loo barbardhigo kharashaadka la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025.

DHABTA KHARASHAADKA BILAHA JANAAYO ILAA ABRIIL HAY'ADAHA DAWLADDA

Shaxda 8^{aad} waxaa ka muuqdo dhabta kharashadka guud Dawladda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026, iyadoo loo kala saarayo sida ay u isticmaaleen qaybaha shaqo ee loo kala qaybiyo hay'adaha Dawladda. Sidoo kale kharashaadka waxaa loo kala qaaday kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda.

Bilaha Janaayo ilaa May 2026, waxaa la bixiyey kharash dhan **\$332Milyan** oo u dhigma **24%** wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka Guud ee Dawladda.

Faah-faahinta	Dhabta Kharashka May 2026	Dhabta Kharashka Jan-May 2026	Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala wareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	% Fulinta
KHARASHKA GUUD	\$83,423,456	\$331,678,964	1,386,807,242	1,386,807,242	24%
Kharashaadka Joogtada	57,393,119	226,914,447	682,453,411	682,388,785	33%
Hay'adaha Adeeg Maamulka	24,789,075	83,092,735	292,474,073	297,383,037	28%
Hay'adaha Adeeg Amniga	23,420,323	111,204,410	275,628,204	271,333,393	40%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	4,213,218	14,959,302	50,520,062	49,809,959	30%
Hay'adaha Adeeg Bulshada	4,970,503	17,657,999	63,831,072	63,862,395	28%
Kharashaadka Mashaariicda	26,030,337	104,764,517	704,353,832	704,418,458	15%
Hay'adaha Adeeg Maamulka	10,227,797	30,457,945	154,841,978	154,906,604	20%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	12,691,397	40,541,743	345,474,219	345,474,219	12%
Hay'daha Adeeg Bulshada	3,111,143	33,764,829	204,037,635	204,037,635	17%

Shaxda 8^{aad}: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda

KHARASHAADKA JOOGTADA AH

Kharashka ugu badan waxaa laga bixiyey miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, waxaana la bixiyey kharash dhan **\$227Milyan** oo u dhiganta **33%** wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026. Kharashaadka joogtada ee la bixiyey ayaa ka ahaa **68%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026.

Iskudarka bilaha Janaayo ilaa May 2026 ayaa Hay'adaha Amniga lagu bixiyey **\$111Milyan** oo u dhiganta **40%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah. Miisaaniyada Hay'adaha Adeegga Maamulka ayaa laga bixiyey **\$83Milyan** oo u dhiganta **28%** miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee Hay'adaha Adeegga Maamulka. Hay'adaha Dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **\$15Milyan** oo u dhiganta **30%**, Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey **\$18Milyan** oo u dhiganta **28%** miisaaniyad sannadeedka Hay'adaha Bulshada.

KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Kharashaadka Mashaariicda ayaa laga bixiyey **\$105Milyan** oo u dhiganta **15%** miisaaniyad sannadeedka kharashaadka mashaariicda, waxayna ka tahay **32%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2026. Mashaariicda hoos yimaado hay'adaha maamulka ayaa laga bixiyey **\$30Milyan** oo u dhiganta **20%** miisaaniyadda mashaariicda ee hay'adaha Maamulka. Mashaariicda hoos yimaada hay'adaha dhaqaalaha ayaa laga bixiyey **\$41Milyan** oo u dhiganta **12%** miisaaniyada mashaariicda ee hay'adaha dhaqaalaha. Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey **\$34Milyan** oo u dhiganta **17%** miisaaniyadda mashaariicda ee haya'daha bulsha.

DHAMMAAD

Lifaaqa 1^{aad}: Faahfaahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah Jan-May 2026

Madaxa	Faahfaahinada	Dhabta Jan-May 2026	Isbadalka Miisaaniyadda ee Kalawareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	%
010100	Xafiiska Madaxtooyada	4,099,756	12,601,848	12,417,366	33%
00000	Undefined	4,099,756	12,601,848	12,417,366	33%
	Mushaarka Shaqaalaha	2,258,503	6,506,754	6,504,072	35%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	394,358	955,293	938,328	41%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	1,845,065	5,494,221	5,508,504	34%
2114	Kharashaadka kale ee Shaqaalaha	19,080	57,240	57,240	33%
	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	1,841,253	6,062,323	5,880,523	30%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	252,500	1,125,000	1,425,000	22%
2221	Hawlaha Guud	107,828	323,492	323,492	33%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	305,976	1,037,959	737,959	29%
2224	Agabka iyo Alaabaha	6,232	18,700	18,700	33%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	36,000	36,000	0%
2231	Kirooyin	60,000	180,000	60,000	33%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	761,453	2,299,320	2,297,520	33%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	347,264	1,041,852	981,852	33%
	Deeqaha	-	32,771	32,771	0%
2621	Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	-	32,771	32,771	0%
010201	Xafiiska Golaha Shacabka	10,643,391	28,077,941	28,004,201	38%
0102011	Governance and Administration (Lower House)	2,111,995	6,731,111	26,641,961	31%
	Mushaarka Shaqaalaha	1,472,745	3,706,215	22,437,960	40%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	905,105	2,196,600	2,167,080	41%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	567,640	1,509,615	20,270,880	38%
	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	639,250	2,109,221	3,288,326	30%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	-	562,500	0%
2221	Hawlaha Guud	125,403	295,250	295,250	42%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	163,840	491,520	245,760	33%
2224	Agabka iyo Alaabaha	78,396	235,200	117,600	33%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	83,836	251,526	45,116	33%
2231	Kirooyin	-	243,600	243,600	0%
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	-	-	280,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	16,535	78,285	36,000	21%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	171,240	513,840	1,462,500	33%
	Soo libsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn	-	915,675	915,675	0%
3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	-	885,675	885,675	0%
3112	Qalabka iyo Mashiinadda	-	30,000	30,000	0%
0102012	Lower House Parliamentary Core Business	8,531,396	21,346,830	1,362,240	40%
	Mushaarka Shaqaalaha	7,767,600	18,763,200	-	41%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	7,767,600	18,763,200	-	41%
	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	763,796	2,583,630	1,362,240	30%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	182,676	720,000	157,500	25%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	-	245,760	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	-	117,600	0%
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	-	120,090	46,500	0%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	581,120	1,743,540	794,880	33%
010202	Xafiiska Aqalka Sare	2,762,892	7,973,196	7,973,196	35%
0102021	Governance and Administration (Senate)	896,260	3,297,096	5,139,396	27%
	Mushaarka Shaqaalaha	373,610	948,096	1,905,696	39%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	66,225	161,280	161,280	41%

Madaxa	Faahfaahinada	Dhabta Jan-May 2026	Isbadalka Miisaaniyadda ee Kalawareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	%
2113	Gunnayin Lacag Cadaan ah	307,385	786,816	1,744,416	39%
	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	522,650	1,609,800	2,474,500	32%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	131,000	393,600	393,600	33%
2221	Hawlaha Guud	47,450	147,600	147,600	32%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	89,000	267,000	267,000	33%
2224	Agabka iyo Alaabaha	86,400	259,200	244,800	33%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	10,000	36,000	34,200	28%
2231	Kirooyin	64,800	194,400	194,400	33%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	6,000	48,000	48,000	13%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	88,000	264,000	1,144,900	33%
	Soo libsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn	-	739,200	759,200	0%
